

28/12/2015

SUGNAANTA DHAQAALAHAA

Sugnaanta dhaqaalaha wuxuu ku saabsanyahay soo celinta hab-nololeedyada dhibbanyaasha colaada hubeysan iyadoo la deegsanaayo hab labadaba ay yihiin kuwa waara sharaftooduna ku ixtiraamantahay.

GARGAAR DOON LAGU GAARSIIYEE DAD WAXYEELO KA SOO GAARTAY FATAHAADA SHABEELAHA DHEXE



caqabad dheeraad ah in wax laga qabtana ay adkeyd.

Alaabta laga keenay doonta waxaa laga qeybiyey lix tuulo oo ku yaalaan gudaha iyo daafaha Degmooyinka Jowhar iyo Balcad, Shabeelaha Dhexe. Qoyskiiba wuxuu helay 50 kg bariis, 25 kg digir, 10 liter saliida cuntada lagu karsado, 6.5 kg (buskutka tamarta sare) ee BP 5, xirmo ku jирто alaabta fayadhawrka, maacuun, teendho, maro kaneecoojin, derin, baal迪yo iyo kaniinka biyaha lagu nadiifiyo.

Kooxaha ICRC waxay la socdaan deegaanada Jubba iyo Shabeelle oo weli ka da'aya marna da'marna joogsada iyadoo ay aheyd in illi roobaadka uu dhammaado.


Jawaanada ciida ayaa la raseeyey jiinka Webiga Shabeelle oo ah halka biyaha ka jabsadeen. ICRC ayaa qeybisay jawaanada ciida ka hor inta uusan bilaaban roobabka Deyrta si loo maareeyo socodka webiga

Waxaaa la adeegsaday doomo si loo gaaro bulshooyin hafiyey biyaha daadka, Guddiga Caalamiga ee Laanqeyrt Cas (ICRC) iyo Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed (SRCS) waxay in ka badan 16,000 qoysas ku nool hareeraha Webi Shabeelle waxyeelana ka soo gaartay fatahaada u qeybiyeen cunto, agabka guryaha oo lagama maarmaanka ah.

Illi roobaadka wuxuu sababay in sare u kaco webiga Shabeelle, kana dhashay fatahaad baahsan kaa oo xaaqay jidaka, go'doomiyeyna bulshooyinka sida daran u ugu dhuftay roobka. Waddooyinka biyaha ka sare maray waxay ICRC iyo SRCS u aheyd



Kooxaha ICRC iyo Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed waxay doon ku gaareen tuulo ku taalo Shabeelaha Dhexe si ay sameeyeen cunto qeybin. Kooxaha in ay gaaraan caqabad ayey ku aheyd sababtoo ah waddooyinka deegaanka ayaa biyo ka sare maray



Si aad u hesho macluumaad dheeri ah oo ku saabsan ICRC-da Soomaaliya boopo www.blogs.icrc.org/somalia/so

Email: sok_somaliblog_services@icrc.org